

Aalborg Øst

Iskaashi iyo wadanoolaansho

Ann-Dorte Christensen
Sune Qvotrup Jensen

”

Si kastaba ha ahaatee waxaa jira farqi u dhexeeya Aalborg Øst iyo Aalborg Øst (...) Nabad gelyo aad u wanaagsan ayaa ka jirta dhinaca kale ee waddada Humlebakken. Wax walba waa la hagaajiyaa meeshaas. Waxaa tan tusaale u noqon kara inaad xaafadda indhaha la raacdo xilliga qaboobaha, sida jidadka yar-yar loo nadiifiyo oo barafka looga xa-aqo illaa iyo meesha loo yaqaan ”trekanten”, waxa ka soo harana sidooda loo dhaafo.

Jytte





70

Hordhac

Buuggan yar (pjece) wuxuu qeyb ka yahay buug weyn oo la yiraahdo *Stemmer fra en bydel – etnicitet, køn og klasse i Aalborg Øst*, oo ay daabacday Aalborg Universitetsforlag 2012. Buuggan waxaa lagu saleeyey mashruuc baaritaan loogu magac daray *INTERLOC Køn, klasse og etnicitet*, oo ay fududeysay Guddiga cilmibaarista arimaha bulshada iyo shaqada (Forskningsrådet for Samfund og Erhverv) 2007 - 2011.

Buuggan yar waxaan ku soo bandhigeynaa natiijada baaritaankii aan sameynay. Waxaan rajeyneynaa inay dad badan ka faa'iideysan doonaan. Warbixin intaa dheer waxaad ka heli kartaa buugga weyn.

Muddadii shanta sano ahayd ee hawsha mashruucan ay socotay waxaan la xiriirnay dad badan oo deggan ama ka shaqeyaya xaafada Aalborg Øst. Waxaana halkan uga mahad celineynaa dhammaan dadkii aan wareysiga la yeelanay iyo qof walba oo gacan ka geystay mashruucan, kuwaasoo kalsooni iyo gacmo furan nagu soo dhaweeeyey. Magacyada dadka aan wareysanay waa la qariyay ama la bedelay, si aan loo aqoonsan.

Waxaa sidoo kale mahad mudan Stine Thidemann Faber iyo Jakob Skjøtt-Larsen oo gacan weyn ka geystay xagga baaritaanka iyo tiro-koobka, gaar ahaan ururinta macluumaadka ku saabsan ururka *Foreningen til Kvindernes Vækst*.

Marie Valentin Beck oo iyaduna gacan ka geysatay xagga diyaarinta qoraalkan. Waxaa sidoo kale mahad mudan Jan Brødslev Olesen oo gacan ka geystay xagga sawirada iyo sameynta bogga hore.

Waxaan rajeyneynaa inay buuggaagtani noqdaan kuwa qeyb ka noqda kor u qaadidda fahamka guud iyo waxyaabaha wanaagsan ee ay xaafaddan Aalborg Øst leedahay.

Ann-Dorte Christensen og Sune Qvotrup Jensen
Aalborg Universitet, 2012

Baaritaankan

Baaritaankan waxaan bilownay shan sano ka hor.

Takhasuskeena dhinaca cilmiga arimaha bulshada dartii ayaa waxaan doorbidnay inaan diiradda saarno qeyb bulshada ka mid ah, si aan u iftiimino dhammaan waxyaabaha saameyn ku yeelan kara nolol-maalmeedka bulshada. Waxaan si gaar ah u xiiseyneyney xiriirka ka dhexeeya jinsiyadda, jinsiga (lab ama dhedig) iyo dabaqadda. Waxaan isku raacnay iney xaafad noqon karto meesha laga heli karo waxyaabahan. Xaafad waxay mar noqon kartaa meel ay ku kulmaan waxyaabahan aan soo xusnay si ay u dhalato wadadhaqan iyo iskaashi bulshadeed, sidoo kale ayey xaafaddu noqon kartaa meesha ay ku kula tagaan dhaqamada kala duwan, taasoo sal u noqon karta sameynta kooxo kala duwan oo bulshada dhexdeeda ah.

Maxaa loo doortay Aalborg Øst?

Sababta ugu weyn ee aan Aalborg Øst u dooraney waa inay tahay xaafadda gobolkan Nordjylland ee ay dad badan oo kala dhaqan ah deggan yihiin. 19% dadka xaafadda deggan waa dad wadamo kale ka soo jeeda, tiradan waa mid aad u yar marka loo eego tirada dadka ajaanibka ee deggan xaafadaha kale ee magaaloooyinka waaweyn ee waddankan Denmark. Taas micnaheedu ma ahan in jinsiyadaha iyo dhaqanada kala duwan aysan saameyn weyn ku yeelan xaafadda Aalborg Øst. Baaritaankan wuxuu caddeynayaa in dad badan ay aaminsan yihiin inay Aalborg Øst tahay xaafad dadka ajaanibka ah ay xoog ku leeyihiin. Taana waxay saameyn weyn ku yeelatay fahamka ama aragtida guud ee laga haysto xaafaddan iyo sida ay dadka deggan xaafadda isu arkaan.

Waxaa kaloon xaafaddan Aalborg Øst u dooranay inay xaafaddan sannooyin badan ka socdeen shaqooyin ururo jamciyadeed iyo horumarin arimaha bulshada ah.

Qaabka baaritaankan

Ujeedada baaritaankan

Ujeedada ugu weyn ee baaritaankan ayaa waxay ahayd in la helo aqoon ku saabsan dhaqan bulshadeed xaafadi leedahay. Su'aalaha dadka la weydiiyayna waxaa ka mid ah:

- Maxaa dhaliya ama xanniba iskaashiga iyo ku xirnaanta xaafada Aalborg Øst?
- Sidey ku timaadaa kala go` bulshadeed? Maxay ka kooban tahay? Saameyn intee le`eg ayey leedahay?



Si aynu u ogaano xaaladaha runta ah ee xaafada Aalborg Øst waxaan baaritaankan adeegsanay qaabab kala duwan:

- **Waraysi** lala yeeshay 27 qof oo deggan xaafaddan, 6 la taliye dhinaca arimaha bulshada (socialarbejdere) iyo shaqaale kale oo ka shaqeeya xaafaddan. Waxyaabaha buuggan yar lagu qorayna waa oraah si toos ah looga soo qaaday dadkan, laakiin waxaa la qariyay magacyadooda runta ah iyo wax walboo keeni kara in dadkani la aqoonsado.
- **Baaritaan 2 urur:** Ururada ”Foreningen for Kvindernes Vækst iyo Borgerforum”
- **Baarid iyo falanqeyn lagu sameeyey 385 qoraal** laga qoray xaafadda Aalborg Øst oo ay qoreen wargeysyada deenishka inta u dhaxeysa 1. januar 2007 - 1. april 2009.
- **Tirakoob iyo daraasaad** ay samaysay jaamacadda Aalborg iyo macluumaad kale oo ku saabsan Aalborg Øst oo laga soo qaatay ”Statistisk årbog for Aalborg Kommune”, ”Statistik om folketal” iyo warbixin ku saabsan baaritaan lagu sameeyey derisnimada xaafadda Aalborg Øst ”Naboskabsundersøgelsen for Aalborg Øst”, kaasoo ay soo diyaarisay *naboskabet.dk*.
- **Dukumeenti, wargeysyo xaafadeed iyo qoraalo kale** oo ay diyaariyeen sida: Kvarterværkstedet iyo Projekt 9220.

Waxaan hadda u guda geleynaa todobada natiijo ee ugu muhiimsan ee baaritaankan.

”Waan ku faraxsanahay inaan halkan deganaado. Ma ahan si-daan u maleynaayey (...) Baahi guri ayaa marka hore xaafaddan i keentay. Laakiin hadda toos ayaan halkan u deganahay, waana ku faraxsanahay. Aragtidayda dhinaca degaanka halkan aad ayey wax isaga bedeleen. Fikrado aad u xun ayaan xaafaddan ka haystay, ka hor intaan u soo guurin. Tusaale ahaan waxaan aaminsanaa in dad badan oo ajnabi ah waxna xada ay halkan degan yihiin, . Laakiin taa run ma noqon.” Peter

1. Qayb ka ahaansho iyo

Guud ahaan dadka deggan Aalborg Øst aad ayey ugu faraxsan yihiin inay halkan deganaadaan. Taana waxay sabab uga dhigayaan inay xaafadani leedahay guryo wanaagsan iyo dhul bannaan oo cagaaran. Dadka siday u badan yihiina waxay qabaan inay xaafadda ammaan tahay. Ku qanacsanaantan waxaa laga heleyaa dad da` walba, jinsiyad, jinsi iyo dabaqad kala gedisan leh. Dhammaan dadka aan wareysiga la yeelanay way ku faraxsan yihiin inay xaafaddan deganaadaan. Baaritaanada la sameeyeyna waxay muujinayaan in dadka deggan Aalborg Øst ku dhowaad 65 % ay u arkaan iney xaafaddan tahay mid ka mid ah labo xaafadood ay jecel yihiin inay degaan. Tan waxay ka sareysaa tusaale ahaan dadka deggan bartamaha magaalada isla markaana ku qanacsan degaankooda iney gaarayaan oo keliya 62,2%. Sidoo kale wuxuu baaritaanka derisnimada ee "Naboskabsundersøgelsen" muujinaya in 73% dadka degan Aalborg Øst ay ku faraxsan yihiin ama aad ugu faraxsan yihiin deganaanshaha xaafaddan.

Ku xirnaanta xaafaddan

Dadka asalkoodu ka soo jeedo wadamada kale waxay dareensan yihiin inay qeyb ka yihiin isla markaana ku xiran yihiin xaafaddan si la mid ah sida kuwa asalkooda uu deenishka yahay. Laakiin marka loo eego waddan ahaan ayaa waxay dadkan laga tira badan yahay u arkaan in aan laga jeclayn waddankan Denmark. Dad badan waxay dareemayaan in laga takooro iskaashiga guud ee waddankan, halka kuwa kalena ay dareensan yihiin in dooda xun-xun ee muslimiinta ku saabsan ay yihiin kuwa xad gudub ah isla markaana lagu dhaawacayo sharaftooda iyo sumcadooda.

Wada hadal wanaagsan

Marka loo eego xaafad ahaan ayaa Aalborg Øst u muuqata inay tahay xaafad dadka deggan, gaar ahaan kuwa waaweyn, ay wanaag ku wada deggan yihiin isla markaana luqad wanaagsan iskula hadlaan. Xitaa haddii anay dadkani xiriir maalmeed oo



ku qanacsanaan degaanka Aalborg Øst

toos ah lahayn, haddana lama hayo tusaalooyin badan oo muujinaya inay jiraan is takoorid iyo iska horimaad joogto ah.

Xiriirka dada kala jinsiyadda ah wuxuu ka dhacaa goobaha ay ka mid yihiin iskuulada iyo xannaanadda caruurta. Dadka aan waraysiga la yeelanayna sidey u badan yihiin waxay u arkaan inay dabiici tahay in dadka ay kala duwanaadaan ama midab kala duwan lahaadaan.

*”Run ahaantii waan ku faraxsanahay inaan halkan deganaado. Wax badan baa Aalborg Øst laga sheeg-sheegaa, laakiin ma ahan wax aan arko ama la kulmo. Waan jeclahay inaan halkan deganaado, maxaa yeelay waa meel nabad ah. Waxaan jeclahay inaan la kulmo caruur bannaanka ku ciyaareysa gaar ahaan xilliga kulaylaha (sommeren). Anigoo dariishadeyda taagan oo alaabta dhaqaya, ayaan arki karaa canugga jiidaya kan kale iyo cidda gar daran, sida ay u ciyaarayaan iwm.. Taana waa wax aad u wanaagsan” **Faduma***

”

Waxaan aad ugu faraxsanahay inaan halkan deganaano. Waa wax laga xumaado in ay dadka qaar kugu yiraahdaan: ”Ma Aalborg Øst ayaad deggan tahay, akhas”. Taana waxaan qabaa inay caruurteena dhib u keeni doonto markay weynaaadaan, maxaa yeelay waxay qaadanayaan magac xumadaa ah in caruurta xaafaddan Aalborg Øst deggan ay mar walba yihiin caruur rabsho badan.
Karin



2. Cambaarayn xaafad – Magac xumo

Dadka xaafadda Aalborg Øst deggan farxadda ay u hayaan xaafadooda ayaa ah mid ka hor imaaneya fikradaha xun ee xaafaddan guud ahaan laga haysto. Baaritaano badan ayaa muujinaya waxyaabahan is-khilaafsan:

- Xaafadda Aalborg Øst waa xaafadda ay dadka magaalada Aalborg deggan siday u badan yihiin aanay jeclayn in ay soo degaan (38%).
- Dhinaca kale dadka deggan Aalborg Øst ayaa ah kuwa aad ugu faraxsan inay degganaadaan xaafadda (65%).

Halkan waxaa ku cad in fikradda ama aragtida ay dadka deggan Aalborg Øst ka haystaan xaafadooda, aad uga duwan tahay tan dadka kale. Taana waxay u muuqataa inay sabab u tahay sumcad darada xaafadda loo sameeyey.

Fal celin ku saabsan sumcad darada

Waxaynu falanqeynay sumcadda xaafaddan anagoo adeegsanayna fikradda ama fahamka ”sumcad xumo xaafadeed” – oo ah magac xumo loo sameeyo xaafad gaar ah. Waxaan halkan ku muujinay sida ay wararka xun-xun ee ay warbaahinta ka sheegto xaafaddan u horseedaan sumcad xumo isla markaana abuuraa sawir xun oo ay xaafaddu yeelato.

Wareysiga aan la yeelanay dadka deggan xaafadda Aalborg Øst, ayaa waxaa ku cad in waxyaabaha xun-xun ee xaafaddan laga sheego aanay saameyn weyn ku yeelan dadka intooda badan. Dadkani siday u badan yihiin kuma qanacsana wararka xun-xun ee ay warbaahinka ka sheegto xaafaddan, waxaynaaminsan yihiin in aanay wararkaasi sax ahayn, maadaama aanay waafaqsaneyn aragtidooda ku aadan xaafadda.

Ugu dambayntii waxaan ogaanay in waxyaabaha xun ee xaafada laga sheego ay xoojin karaan ama ay xannibi karaan hawl ururureedka iyo iskaashiga guud ee halkaas ka jira. Dadka xaafadda deggan qaarkood ayaa waxay door bidaan inay bannaanka ka istaagaan wax walboo xiriir la leh magaca Aalborg

Øst, ayagoo ka cabsanaya inay sumcad xumo ka soo gaarto, meesha qaar kalena ay xanaaq dartiis ay sameeyaan dadaal weyn oo ku saabsan siday u bedeli lahaayeen sumcad xumada aan xaqa ahayn ee xaafadda loo sameeyey.

”Waxaan qabaa inay warbaahinta si xun ula dhaqmaan xaafaddan. In mudo ahba taas way sameynaayeen. Hadda waxay u muuqataa inay waxoogaa sidii hore dhaanto. Sanooyin badanba waxay warbaahinta wax walboo xun ee ka dhaca xaafadaha kale ee magaalada Aalborg sida Øgadekvarteret ama Vejgård ku dabaqi jireen Aalborg Øst, xitaa haddii aaney saameyn toos ah ku lahayn xaafaddan.”. Hanne



3. Kala qaybsanaan nololeed

Inkastoo ay dadka deggan Aalborg Øst ku faraxsan yihiin deganaanshaha xaafadooda, haddana waxaa jira kala qaybsanaan dhinaca bulshada ah.

Kala qaybsanaan dhinaca deegaanka

Waxaa dadka xaafaddan deggan kala qaybiya:

- inuu qofku deggan yahay ”dhinaca fiican ama ka xun” ee jidka Humlebakken,
- farqi u dhexeeya guryaha waaweyn (villakvartererne) iyo guryaha ijaarka
- farqi u dhexeeya jidadka xaafadda
- farqi u dhexeeya dhismayaasha kala gedisan iwm.

”Anaga ma ahee, waa ayaga”

Kala qaybsanaantan dhinaca deegaanka ah ayaa badanaaba sameyn ku yeelata bulshada. Tusaale ahaan dad badan oo guryaha waaweyn deggan ayaa iska dheereeya kuwa deggan guryaha ijaarka. Laakiin isla sidan oo kale ayey dadka guryaha ijaarka deggan isku kal soocaan hadba jidka oo goobta uu qofku deggan yahay. Tusaale ahaan dad badan oo xaafadda deggan ayaa qira inay dhibaatooyin ka jiraan xaafaddan, laakiin meesha uu dhibku ka jiro aanu ahayn qaybta ay ayagu xaafadda ka deggan yihiin.

*”Haa, qaybtaas ayaan qabaa inay tahay qaybta xun ee wadadda Humlebakken. Qaybteena xasilooni ayaa mar walba ka jirta, waana dhinacaa iyo Aggersundvej, Feggesundvej iyo Fyrkildevej, meelaha ay rabshadaha ka jiraan (...) Waxaan u maleynayaa inay ayagana laftigooda nala qabaan in qaybteena xoogaa ay ka fiican tahay qeytooda.”
Jytte*



Waxaa kaloo jira waxyaabo kale oo kala qaybiya bulshada xaafaddan. Baaritaankan wuxuu muujinayaa inay beerta yar ee guryaha iyo xannaaneynta caruurta ay ka mid yihiin waxyaabaha ugu badan ee bulshada kala qaybiya. Tan waxay qeyb ka tahay sida ay dadka xaafaddan deggan ugu kala aragti duwan yihiin waxa wanaagsan iyo aadaabta fiican.

Beero

Dadka guryaha waaweyn deggan ayaa ah dad aad uga shaqeeya beerahooda. Taana waxaa sabab u ah inay dadkani jecel yihiin in wax walba sida ugu haboon ahaadaan, amaba ay rabaan in sicirka guryahani uu ahaado mid sare.

Si sumcadda xaafadda kor loogu qaado ayaa waxay shirkadaha guryaha sanadihii ugu dambeeyey bilaabeen inay ku qabsaan dadka guryahooda deggan inay hagaajiyaan beerahooda. Dadka guryahani deggan ayaa fikrado kala duwan ka qaba arintan ku saabsan hagaajinta beeraha. Qaarkood waxay qiraan lagama maarmaan nimada hagaajinta beeraha, halka kuwa kalena ay u arkaan inay tani tahay faragelin aan loo baahneyn oo dhinaca shirkadaha ah.

Caruur

Waalidiinta halkan deggan siday u badan yihiin waxay soo dhaweeyaan inay caruurta kala jinsiyadda ah ay saaxiibo noqdaan oo isla ciyaaraan. Laakiin waxay waalidiintan ku kala aragti duwan yihiin doorka ay waalidiinta ka qaadan karaan isdhexgalka caruurta. Waxaa cad inuu xiriirka caruurtani uu ka bilowdo kuna kooban yahay iskoolada iyo xanaanada caruurta, sidaas darteed ayey dad badan oo xaafaddan deggan jeclaan lahaayeen inuu xiriirkan ku soo fido guryahooda.

”Ma is weydiino, ma soomaali baa, ma turki baa? Waa caruurteena saaxiibkood. (...) Waan hubaa inay tani u wanaagsan tahay caruurteena, wana ku faraxsanahay inay caruurteena lahaadaan wanaagaa aysan dadka ku kala dooranayn meeshaay ka yimaadeen. Taana waxay ka mid tahay waxyaabaha qiimaha leh ee ay noloshu xaafaddani leedahay” Tommy



4. Khibradaha iyo waxtarka dadka kala dhaqanka ah

Sidaynu horey u soo sheegnay dadka ajaanibka ee deggan Aalborg Øst waxayaminsan yihiin inay qeyb uga yihiin xaafaddan, isla sida kuwa deenishka. Ma ahan wax is diidaya in dadkani ay qeyb ka ahaadaan xaafadda ayagoo isla markaana sii haysta dhaqankoodii hore.

Kulan dhaqameed

Meelaha qaar ayaa u muuqda in khibradaha laga helo dhaqamada kala duwan loo arko inay yihiin kuwa wanaagsan oo waxtar leh, sida kulan dhaqameedyada. Dadka la wareystay qaarkood waxay qabaan inay kulamada caruurta kala jinsiyadda ah ay yihiin kuwo wanaagsan. Dhinaca kalena waxaan la kullanay dad aan wax xiiso ah u hayn nolosha dhaqamada kala duwan ee Aalborg Øst. Waxay arrintan u arkaan in aanay ayaga khuseynin.

Faraq u dhexeeya dadka asalkoodu wadamo kale ka soo jeedo

Dad badan oo aad u firfircoon oo meelo kala gedisan ka soo jeeda ayaa deggan xaafadda Aalborg Øst. Waxaa jira tusaalooyin badan oo ku saabsan sida kala duwanaanshaha jinsiyada loogu adeegsan karo qaab wax tar leh, sida sameynta ururo, cashar caawin, kullamo waalidiin iwm. Dhinaca kale waxaa jira tusaalooyin muujinaya inay jiraan dad ka mid ah kuwa laga tira badan yahay oo ka go' doonsan bulshaha inteeda kale. Dadka noocan oo kale ah waan ognahay inay xaafadda deggan yihiin, laakiin kama aanay qeyb qaadan wareysiyadeena, madaama dadkan inta badan aanay xiisad u hayn arrimaha noocan oo kale ah.

Waddo iyo asal

Marka laga hadlayo dadka laga tiro badan yahay waxaa muhiim ah in wax laga ogaado asalkooda meesha ay ka soo jeedaan, tariikh nololeedkooda iyo sida ay halkan ku yimaadeen. Sheeko-

oyinkani waxay xambaarsan yihiin dhibka iyo xanuunka ay leedahay inuu qofku ku qasbanaado inuu ka tago qoyskiisa iyo dhulkiisa. Laakiin sidoo kalena waxaan aragnay ifafaalo badan oo muujinaya dadaalka iyo rabitaanka dadkan ee ku aadan sida ay qeyb uga noqon lahaayeen bulshadan cusub.


Jasmina oo ka hadlaysa ka soo qaxida Soomaaliya

”Waxay ahayd wax aad u xun. Mana jecleyn arrintaas. Cabsi weyn ayey igu abuurtay inaan qoyskeyga ka tago. Denmark waxaan imid xilli qabow, luqadda deenishkana waxba kama aanan fahmeyn [...] Wax la yaab leh ayey ila ahayd, maxaa yeelay waxay ahayd markii iigu horeysay ee aan la kulmo dad caddaan ah, waxay ahayd wax aan la fajacay. (...) Laakiin waxay noqotay meel xiiso leh, waxaan helay baaskiil, waxaan bilaabay xanaanaada caruurta, halkaas oo aan gabar daanish ah kula saaxiibay. Ka dibna waxaan luqadda daanishka ku bartay wax ka yar saddex bilood (...).

Sheekooyinkan kala duwan waxaan ka arki karnaa in uu imaanshaha waddankan Denmark uu ahaa mid aan sahlaneyn. Laakiin dadka siday u badan yihiin way la qabsadeen nolosha waddankan iyo waliba nolol maalmeedka Aalborg Øst. Arrintan waxaa ka wada siman dadka waaweyn iyo waliba caruurtooda oo aan marna ku fekerin inay meel kale ku noolaadaan.

In waddankii hooyo loo noqdo

Dhinaca kale waxaa inta badan ku adag dadka waaweyn iyo caruurtooda yar-yarba inay waddanka ay ka soo jeedaan dib ugu noqdaan, haddii ay noqon lahayd booqasho gaaban iyo mid dheerba. Dadkani waxay halkaas kula kulmaan dhaqammo

A photograph of a residential area with brick houses and a large tree in the foreground. The sky is clear blue. The houses are two-story brick buildings with dark roofs. A large tree trunk is visible on the right side of the frame, and its bare branches extend across the top. The foreground is a green lawn.

iyo waxyaalo kale oo aanay jecleysan. Sidoo kale ayaa waxaa dadkan dhib ku noqon kara inay ka soo baxaan waxyaabaha ay familkkooda iyo asxaabtooda ka sugayaan, hadday noqon lahayd dhinac dhaqaale iyo dhinac darajo bulshadeed.

Run ahaantii waxay u muuqataa in dadka qaar-kood ay u fududahay inay sawir fiican ka sii haystaan waddankii hooyo inta ay Denmark joogaan, laakiin uu sawirkan wax badan iska bedelo marka lagu noqdo waddankii.

“Waxaan aadaa Turkiga labo bilood xilliga kuleylaha ah sanad walba. Laakiin marna ma sii joogi karo meeshaas. Waxaan lahaa qorshe ah inaan waddankayga hooyo dib ugu laabto. Laakiin markaan 45 maalmood joogaba, waxaan dib ugu soo noqdaa Denmark.

*Waxaan raba inaan soo noqdo. Ma sii joogi karo halkaas. Usbuuc kaliya markaan meesha joogno, wuxuu wiilkayga bilaabaa inuu i weydiiyo: “Goorma ayaan noqonaynaa, goorma ayaan gurigeena ku noqoneynaa?” Inkastoo wiilkayga ku faraxsan yahay inuu halkaas joogo, haddana wuxuu xidid ku leeyahay halkan.” [...] “Ma u malaynaayo inaan waddankaygii hooyo dib ugu noqon doono. Ma jecli nidaamka ka jira Turkiga, waxaana qabaa inay ku xirnaantayda Waddankan Denmark ka weyn tahay tan Turkiga. **Almas***



”Doodaha ku saabsan muslimiinta waddankan waa kuwo xanuun badan leh. Waxaa mar walba muslimiinta laga bixiyaa sawiro xun-xun (...) Marka koox yar oo muslimiin ah ay wax khalidan sameeyaan, waxay telefishanada uga hadlaan sidii inay muslimiinta oo dhan khaladka wada sameeyeen. Waxaa mar walba madaxa na loogu shubaa inay muslimiinta oo dhan wada xun yihiin. **Natifa**



5. Ururo

Baaritaankan wuxuu muujinayaa in ururada bulshada ay laf-dhabar u yihiin hawlaha waxqabadka leh ee ka socda xaafadda Aalborg Øst. Waxaan si gaar ah baaritaankan ugu eegnay labo urur:

- Borgerforum
- Foreningen for Kvindernes Vækst.

Labada baaritaan ee ururadan waxay muujinayaan inay adag tahay in la mideeyo ama hal mar la wada qabto shaqo urur-reeedka iyo howlaha guud ee bulshada .

Borgerforum waa urur uu qof walba oo deggan 9220 Aalborg Øst uu xubin ka noqon karo. Hawl maalmeedka ururkan waxaa fuliya xubno laga soo doorto shir sanadeedka ururka.

Ururka Borgerforum wuxuu u shaqeeyaa sida afhayeenka xaafadda ee bulshada inteeda kale. Ururka wuxuu ku dadaalaa sidii uu saameyn ugu yeelan lahaa maamulka magaaladan Aalborg iyo waliba sawirada ay warbaahinta ka bixiso xaafaddan. Intaa waxaa u sii dheer inuu ururkan qeyb ka yahay wada shaqeyn badan oo ka jirta xaafaddan.

Ururkan wuxuu marar hore soo qabtay hawl bulshadeed badan oo u baahan in howl iyo shaqo adag la geliyo. Sidaa darteed wuxuu ururka hadda go'aansaday inuu ku kaaftoomo oo uu xoogga saaro siduu saamayn ugu yeelan lahaa go'aannada ka soo baxa maamulka degmada. Waxaa la arki doonaa in ay tani wax ka tari doonto sidii uu ururkan u noqon lahaa cod mideysan oo ay xaafaddani leedahay.

Maamulka degmadan lacag yar ayuu ururka Borgerforum ku saacidaa, hawl maalmeedka ururkana waxaa ka caawiya Kvarterværkstedet. Taageeradan waxay xadideysaa shaqada ururka uu qabto, laakiin dhinaca kale waxaa adag inuu ururku sii socdo taageeradan la'aanteed.



Ururka "Foreningen for Kvindernes Vækst" waa urur haween. Walow ay ururkani jinsiyado badan xubin ka yihiin, haddana xubnaha ugu fir-fircoon waa soomaali.. Hawl maalmeedka ururkan waxaa fuliya gudi laga soo doorto kulan sannadeedka ururka.

Ururkan wuxuu shaqada bilaabay sanadkii 2008, ka dib markii koox dumar soomaali ah ay isku dayeen inay sameeyaan urur ka garab gala inay caruurtooda caawiyaan. Isla waqtigan ayey ahayd markii mashruuca horumarinta xaafadda "Kvarterløft" uu u qoondeeyey lacag lagu bilaabo urur ka caawiya haweenka waddamada kale ka soo jeeda ee deggan xaafaddan dhinaca is-dhexgalka ama sidii ay uga mid noqon lahaayeen bulshada inteeda kale.

Ururkan si deg-deg ah ayuu u guuleystay. Ururkan wuxuu isla markiiba qabtay shirar badan oo isugu jira muxaadarooyin, safaro gaagaaban iyo shirar kale oo dhaqanka ah iwm. Haweenkan waxay mararka qaarkood ku doodaan in sharciyaha iyo qaabta shaqo urureedka loo qabto ay hor istaagi karto waxyaabo badan oo ay rabaan inay bulshada u qabtaan. Waxay su'aal ka keenaan in qaabka ururada loo sameeyaa uu yahay sida ugu wanaagsan ee isdhexgalka dadka lagu hormarin karo ama inay jiraan qaabab kale oo ay dadka ku kulmi karaan waxna ku wada qabsan karaan.

6. Dhallin yaro iyo caruur xoog la saaro

Mowduucyada iyo qaababka kala gedisan ee baaritaankan uu ka kooban yahay ayaa waxaa ku cad inay caruurta iyo dhalinyarada Aalborg Øst ay yihiin waxa ugu badan ee ay dadka ku mashquulsan yihiin. Tan waxaa laga arki karaa sida ay warbaahinta uga hadlaan xaafaddan, tusaale ahaan wararka xun-xun ee ay jaraa'idka ka qoraan xaafaddan waxay ku saabsan yihiin niman dhalinyaro ah oo wadamo kale ka soo jeeda.

Waxaa kaloo arrintan laga dheehan karaa wareysiyadeena, kuwaasoo ay dadka wax badan uga hadlaan caruurtooda ama kooxo dhalinyaro ah oo rabshado ka sameeya xaafadda.

Waxaa kaloo taa sii dheer in arrintan laga arki karo labada urur ee aan baaritaanka ku sameynay. Waa marka horee muhiimadda u weyn ee ay lahaayeen haweenka xubnaha ka ah ururka "Foreningen for Kvindernes Vækst" waxay ahayd inay wax u qabtaan caruurtooda iyo dhalin yaradooda. Marka xigana waxaa Ururka "Borgerforum" shirarkiisa si is-daba joog ah u soo gaara warar ku saabsan wel-welka iyo daryeelka dhalinyarada, walow aanay mawduucyada shirarka inta badan ku jirin.

Ugu dambayntii arrintan ku saabsan in xoogga la saaro waxyaabaha saameeya caruurta iyo dhalinyarada, ayaa ah arrin saameyn weyn ku yeelatay hawl bulshadeedka laga wado xaafaddan, hadday noqon lahayd mid xirfadeed iyo mid ikhtiyariba. Dadka isku daya inay wax u qabtaan ama caawiyaan caruurta iyo dhalinyarada xaafaddan ayaa waxaa ka mid ah naadiyasha dhalinyarada ee xaafadda sida "lokale ungdomsklubber", "Det sociale Jægerkorps", "Projekt 9220s ungekoordinator" iyo "Natteravnene".





”Caruurta waa dadka kuwa ugu dhexdhexaadsan (...) Caruurta waa kuwa dabiici ah, marka la eego noolaha oo dhan. Caruurta ma eegaan midabka, wax qiimeyn ah oo weyn-na ma siiyaan luqadda, oo waa isugu mid inay ku hadlaan luqad daanish ah oo jajaban ama mid sax ah. Ciyaar waa u ciyaar caruurta. Xitaa uma baahna inay is fahmaan si ay u wada ciyaaraan. Waa arin cajiib ah. **Leila**



7. Wada shaqaynta ka dhexeysa jinsiyad, jinsi iyo dabaqadd

Mid ka mid ah natiijooyinka baaritaankan waxay muujinaysaa in jinsiyadaha ay door weyn ka ciyaaraan xaalada Aalborg Øst. Walow dadka xaafadda deggan 19% oo keliya ay yihiin kuwa asalkooda ka soo jeeda wadamo kale, ayaa haddana waxaa xaafadda inta badan lagu tiriyaa inay tahay xaafad ajnabi.

Tan waxaa laga arki karaa naaneysta "Bangla Desh" oo xaafaddan loo bixiyey sanadihii 1970' meeyadii, taasoo loola jeeday inay xaafaddani ahayd meel ay dadka ajnabiga ah ku badan yihiin. Baaritaankeenana wuxuu caddeynayaa sida ay warbaahinta qeyb uga yihiin sii jiritaanka sawirkan ah inay xaafaddu tahay xaafad ajnabi. Waxaa kaloo uu baaritaankan caddeynayaa sida ay dhaqamada kala duwan, jinsiyadaha kala duwan iyo jinsiga qofka lab ama dhedig qeyb uga yihiin wanaaga iyo wada noolaanshaha ka jira xaafadda Aalborg Øst.

Jinsiyad iyo dabaqad

Jinsiyadda iyo dabaqadda qofka ayaa ah kuwa door muhiim ah ka ciyaara marka laga hadlayo arrimaha ku saabsan waxa wanaagsan iyo waxa la ogo laan karo. Tani waa mid ay ka wada siman yihiin dadka asalkooda daanishka yahay iyo kuwa wadamada kale ka soo jeedaba.

Meelaha ay aragtida noocan oo kale ah si aad uga muuqato ayaa ah arrinta ku saabsan waalidka iyo waxa looga baahan yahay. Barbaarinta caruurta iyo dadka ay la ciyaari karaan iwm. ayaa waxay noqon karaan waxyaabaha ay dadka sida fudud ugu kala qeybsami karaan.

Waxaa kaloon aragnay in waalidiinta ajaanibka ah ay aad ugu dadaalaan inay caruurtooda waxbarasho sare helaan, ka dibna heerkooda bulshadeed uu kor u kaco. Tan waxay dad badan u arkaan inay tahay jidkii bulshada looga mid lahaa.

"Waxaa jira caruur rabshado sameeya, ma rabo inuu canugayga la ciyaaro caruurta (...) Maya, canugayga waa inuu la ciyaaraa caruurta ay isku da'da yihiin, si aan loo barin waxyaabo qaldan (...) Waan ogahay inay jiraan waalidiin aan caruurtooda si fican u barbaarinin. Waxaa jira caruur yar-yar oo jidadka taag-taagan maalintii oo dhan iyo waliba habeenkii illaa iyo afar saac. Taas ma ahan wax la qaadan karo (...) Caruurtaayda waa inay la ciyaaraan caruurta waalidiinta fican leh oo keliya". Samira

Jinsiyadda iyo jinsiga (lab ama dhedig)

Ugu dambayntii wuxuu baaritaankan muujinayaa, in dadka ajaanibka ah dhexdooda ay ka jirto kala duwanaan weyn oo xagga jinsiga ah. Natiijada baaritaankan waxaa kaloo ay ka hor imaansaa sawirka khaldan ee ay warbaahinta ka bixiso dumarka ajaanibka ah, kaasoo ah inay dumarkani yihiin dad daciif ah oo la cadaadiyo. Waxayba u muuqataa inay dumarkani yihiin dumar awood iyo hawl-karnimo dheeraad ah leh. Waxaase nasiib darro ah in qaar ka mid ah ragga ay heystaan dhibaatooyin bulshadeed oo badan.



”Waxaan mar walba isu arkaa sidii inaan ahay canug la soo korsaday: Canugga qoys kale ay soo korsadaan wuxuu mar walba ku xirnaadaa qoyska soo korsaday, walow hooyadii dhashay ay joogto. Aniga waxaa la igu dhalay waddanka Turkiga, waxaase la igu soo barbaariyey waddankan Denmark.

Almas



Buuggan yar wuxuu soo koobayaa natiijada mashruuc cilmi baaris ah (forskningsprojektet *INTERLOC Køn, klasse og etnicitet*), kaasoo ku saabsan iskaashiga iyo wada-noolaanshaha xaafadda Aalborg Øst.

Buuggan yar waxaa daabacaadiisa gacan ka geystay Spar Nord Fonden iyo Machadka arrimaha bulshada ee jaamacadda Aalborg (Institut for Sociologi og Socialt Arbejde, Aalborg Universitet”.

Ann-Dorte Christensen waa barafisoor ka tirsan machadka barashada cilmiga bulshada ee jaamacadda Aalborg (professor ved Institut for Sociologi og Socialt arbejde, Aalborg Universitet). Waxay si gaar ah baaritaan ugu sameysaa arrimaha ku saabsan xiriirka ka dhexeeya jinsiga, muwaadinnimada iyo nolol maalmeedka bulshada.

Sune Qvotrup Jensen wuxuu isna macallin ka yahay machadka barashada cilmiga bulshada ee jaamacadda Aalborg (lektor ved Institut for Sociologi og Socialt Arbejde, Aalborg Universitet). Waxay shaqadiisu tahay sameynta baaritaanada dhinaca jinsiga, dhaqan hoosaadka bulshada iyo waxbarashada la xiriirta dhinaca magaalooyinka.

Dalbo buugga weyn ”Stemmer fra en bydel – etnicitet, køn og klasse i Aalborg Øst” (oo ay soo saartay madbacadda jaamacadda Aalborg (Aalborg Universitetsforlag) Waxaad buugan ka gadan kartaa bogga internetka ee madbacaddan: www.forlag.aau.dk ama dukaanada buugaagta gada (boghandler) Qiimaha buuggan waa kr.: 250,- oo keliya

Buugan yar ”*Iskaashi iyo Wadanoolaansho - xaafada Aalborg Øst*” waxaa lagu daabacay luqadaha danish, carabi, soomaali iyo turki.

Aalborg Øst. Iskaashi iyo wada noolaansho
Qore: Ann-Dorte Christensen og Sune Qvotrup Jensen

Daabacaadda 1.aad 2012

© Madbacadda Jaamacadda Aalborg (Aalborg Universitetsforlag) 2012

Galka, Hagaajin iyo isku dubaridka: akila v/ Kirsten Bach Larsen

Sawirka bogga hore: Jan Brødslev Olsen

Sawirada kale: Jan Brødslev Olsen, Mark Juul Nielsen,

Amina M. Hassan og Projekt 9220 Aalborg Øst.

Dadka sawirka laga qaaday ma ahan dadka la wareystay

Tarjumaad af soomaali: Abdulkadir Sheikh Abdullaahi

Tarjumaad af carabi: Mounir Khalife

Tarjumaad af turki: Melis Andersen

Waxaa lagu daabacay: Toptryk Grafisk ApS, 2012

ISBN: 978-87-7112-049-3

Buuggan yar waxaa soo saaray:

Aalborg Universitetsforlag

Skjernvej 4A, 2. sal

9220 Aalborg Ø

T 99407140

F 96350076

aauf@forlag.aau.dk

forlag.aau.dk

Xuquuqda buuggan waxay u dhowrsan tahay soo saaraha. In wax laga bedelo, la sawiro ama si kale loo isticmaalo waxay fasaxan tahay oo keliya haddii ay waafaqsan tahay sharciyada wasaaradda waxbarashada iyo Copy-Dan. Isticmaal kale oo aan arrintan waafaqsaneyn ayadoon ogoalaansho laga helin soo saaraha waa mid sharci darro ah. Waxaase fasaxan in laga qaato qeyb yar oo loo isticmaalo qiimeyn buuggan ah.

ISBN 978-87-7112-049-3



9 788771 120493